

## Xarumaha Qiimeynta ee Isku-dhafan

Adeegyadayada xarunta waxa ku jira qiimeynta cillad, dib-u-qiimeyn iyo la-tashiyo. Khubaro isku-dhafan a y a adeegyo u qabta dadka qaba:

- Noocyada cilladaha ootismka
- Kortaanka daaha
- Naafada koritaanka oo leh arrimo dabecad oo la socda
- Cilladda Down Syndrome
- Naafada garaadka
- Cilladda Williams

Khubarada Xarunta Nisonger waxay wax ka qabtaan arrimo adag oo la xidhiidha naafooyinka korniinka waxana ay gargaar ka geysan karaan qorsheynta daweynta.

## Nala Soo Xidhiidh

Si aad ballan uga samaysato mid ka mid ah xarumahayaga, fadlan wac **614-685-6701**.



## Hadafka Nisonger

Ujeedka Xarunta Nisonger Center ee Ohio State University waa in lala shaqeeyo bulshada si loo qiimeeyo loona taageero ka-qaybgal dhab ah ee dadka qaba naafooyin ee ah da' kasta iyada oo la adeegsanayo waxbarasho, adeeg iyo cilmi-baadhis. Xarunta waxay gargaar siisaa dadka qaba naafooyin, qoysaska, adeeg bixiyeyaasha iyo hay'adaha si loo horumariyo ka-qaybgalka waxbarashada, caafimaadka, shaqada iyo goobaha bulshada. Xarunta Nisonger Center ee Ohio State University waxay qayb ka tahay Machadka Dareemeyaasha (Neurological Institute) ee Ohio State, oo ah barnaamij cilmiga dareemeyaasha oo qaran ahaan la ictifaafsan yahay. In ka badan 180 bare oo ka tirsan qaybaha Cilmiga Dareemeyaasha, Daraasaddaa Dareemeyaasha, Qalliinka Dareemeyaasha, Daweynta Jidhka iyo Dhaqan-celinta iyo Xarunta Nisonger ayaa ku midoobay in qiimeynta iyo cilaajiyada ugu casrisan, uguna waxtar badan la gaadhsiyo bukaanka Ohio State.



★ McCampbell Hall

Nisonger Center Interdisciplinary Clinics  
395 McCampbell Hall  
1581 Dodd Dr.  
Columbus, OH 43210  
614-685-6701  
nisonger.osu.edu



## Xarunta Nisonger

Xarunta Caafimaadka ee Isku-dhafan (Interdisciplinary Clinics)

Xarunta Korniiinka ee Isku-dhafan  
(Interdisciplinary Developmental Clinic)

Xarunta Ootismka Da'da Dugsiga iyo Korniiinka  
(School-Aged v vAutism and Developmental Clinic)



# Xarunta Nisonger Xarumaha Isku-dhafan (Interdisciplinary Clinics)



## Xarunta Korniinka ee Isku-dhafan (Interdisciplinary Developmental Clinic)

DADA 1–5

### Ujeedo

Si loo sameeyo qiimeyn dhammeystiran oo isku-dhafan oo ku saabsan farsamooyinka korniinka iyo baahida ilmaha iyada oo xoogga la saarayo cillad-sheegid iyo talooyin caafimaad oo loogu talagalay waalidka iyo adeeg bixiyayaasha.

### Dadka loo adeego

Qoysaska leh carruur da'doodu tahay illa shan jir ee walaac ka qaba korniinka ilmahooda.

### Adeegga

Qiimeynta cillad-sheegidda ee xarunta waxa ku jira fiirayn ku saabsan ilmaha, wareysiyo lala yeeshay daryeel-bixiyayaasha, qiimeyn hawlgaal oo cabbir sugan iyo baadhitaan jidhka ah. Marka la tilmaamo, waxa la bixiyaa talooyin ku saabsan adeegyo daryeel caafimaad oo dheeraad ah waxaana loo gudbiyaa xarumo ku habboon adeegga bulsho. Qiimeyntu waxay u baahan tahay in xarunta la soo booqdo labo goor.

## Xarunta Ootisimka Da'da Dugsiga iyo Korniinka

DA'AHA 6–22

### Ujeedo

Si qoysaska loogu qabto adeegga qiimeyn cillad-sheegitaanka, dib-u-qiimeynta ama la-tashi ku saabsan dhallinta ah da'da dugsiga.

Xaruntu waxay qiimeysaa awoodda iyo baahida korniin ee ardayga. Waalidku waxay awoodaan inay walaacooda kala hadlaan khubaro isku-dhafan oo bixisa cilad-sheegid iyo talooyin la xidhiidha farsamooyinka bulsho, dabecad iyo waxbarasho.

### Dadka Loo Adeego

Xaruntani waxay qiimeysaa ardayda leh ama lagu tuhmo Naafooyin Garaad/Korniin, oo ay ku jiraan Noocyada Ciladdaha Ootisim.

### Adeegyo

Qiimeyntu waxay ka kooban tahay wareysi caafimaad oo lala yeesho waalidka iyo daryeel bixiyayaasha kale iyo qiimeyn lagu sameeyo awoodda korniin ee ilmaha iyo/ama baahida dabecadda. Qiimeynta korniin/dabecad waxay ka kooban tahay fiiri qaabeysan iyo mid aan qaabeysnayn oo ku saleysan ciyaar iyo isdhexgal iyo baadhis cabbir sugan. Inta lagu jiro ballanta ah la-sii- socodka, waxa waalidka lagala hadlaa natiijada qiimeynta iyo talooyinka si loo soo saaro taageero iyo adeegyo. Waalidka waxa la siiyaa muuqaal korniin iyo dabecad oo ah ilmaha iyo talooyin iyo/ama cilad-sheegid muhiim ah. Qiimeyntu waxay u baahan tahay in xarunta la yimaado laba illaa saddex goor.

## Shaqaale

Khubarada ka hawlgala xarunteenna waxa ka mid ah:

- Daraasadda Maqalka
- Daweynta Cilmi-nafsiga
- Korniinka iyo Dabecadda Caruurta
- Cilmiga Nafaqada iyo Caafimaadka
- Cilaajka Xirfadda
- Cilaajka Jidhka
- Shaqada Bulshada
- Waxbarashada Gaarka ah
- Cudurka Hadalka-Luqadda

Xarumahayagu waxay tababar siiyaan ardayda qalinjabisay oo leh aqoon kala duwan oo la xidhiidha naafooyinka korniinka. Kooxaha isku-dhafan waxay ka kooban yihiin bareyaal iyo tababartayaal ka socda qaybahaas cilmiga.

## Bixinta Kharashka

Dhammaan barnaamijyada caymiska ee waaweyn, Medicaid iyo Bureau for Children with Medical Handicaps (Xafiiska Caruurta Qaybta Naafooyin Caafimaadka) waa la aqbalaa.